

# Filing an Unemployment Appeal at the Minnesota Court of Appeals Gudbinta Racfaan kadhanka ah go'aan laxariira Gunada Shaqo la'aanta oo loo gudbiyo Maxkamada Racfaanada ee Minnesota

Revised March 21, 2025/Wakhtigii Qoraalka 21dii Maarso, 2025

This packet is provided as a general guide to the process of appealing from a final decision by an Unemployment Law Judge (ULJ) about a claim for unemployment benefits. The final decision that you can appeal is a ***ruling on a request for reconsideration***.

Baakadaan waxaa loogu talagalay inay tilmaan guud kabixiso hanaanka racfaanka kadhanka ah go'aanka kama danbaysta ah ee uu gaaro Xaakimka Sharciga Shaqo la'aanta (ULJ) oo laxariira codsi lagu codsaday gunooyinka shaqo la'aanta. Go'aanka kama danbaysta ah ee aad racfaanka kaqaadan karto waa ***xukun kudhacay codsiga dib u eegista xukunka***.

These instructions explain the steps to start an appeal and answer common questions, but are not a full guide to the law.

Tilmaamuhu waxay sharaxayaan talaabooyinka aad kubilaabayso racfaanka kadhanka ah maamulka iyo sida aad uga jawaabayso su'aalaha guud, laakiin maaha tilmaamo buuxa oo sharciga laga bixinaayo.

Please read this entire packet carefully. If you do not understand any of the steps or do not know if these forms are right for your situation, you should speak with an attorney for legal advice. Court employees are able to give general information about court rules and procedures, but they cannot give legal advice.

Fadlan akhri dhamaan buggaan si taxadar leh. Haddii aadan waxba kafahmin talaabooyinka ama aadan aqoon in foomamkaan ay yihiin kuwo xaaladaada kuhabboon iyo hadii kale, waa inaad kala hadashaa qareen si uu talo sharci kuusiiyo. Shaqaalaha maxkamadu waxay awoodaan inay macluumaad guud kaasiyaan xeerarka maxkamada iyo hanaanada laraacaayo, laakiin kuma siin karaan talo sharci.

**This packet includes/Buuggaan waxaa kujira:**

- Step-by-Step Instructions for Filing an Unemployment Appeal  
Tilmaamaha Talaabo-talaabada ah ee qaabka aad Ubuuxinayso Racfaan laxariira Shaqo la'aanta
- Form: Petition for Writ of Certiorari  
Foomka: Racfaanka Go'aanka Kama Danbaysta ah
- Form: Statement of the Case  
Foomka: Bayaanka Kiiska
- Form: Writ of Certiorari  
Foomka: Dib u eegista xukunka kama Danbaysta ah
- Form: Certificate of Service by Mail of the Petition, Unsigned Writ, Statement of the Case, and Unemployment Law Judge's Decision  
Foomka: Shahaadada Adeegga ee Lagu Diro Boostada Racfaanka, Xukun aan Lasaxiixin, Bayaanka Kiiska, iyo Go'aanka Xaakimka Sharciga Gunada Shaqo la'aanta
- Form: Certificate of Service by Mail of the Issued Writ of Certiorari  
Foomka: Shahaadada Adeegga ee Lagu diray Boostada Dib U eegista Xukunka Lasoo saaray
- Form: Certificate of Service by Mail of Brief  
Foomka: Shahaadada Adeegga ee Boostada lagu diray ee Dacwada Kooban

**For Additional Assistance/Wixii Caawimaad dheeri ah:**

Additional helpful materials, including example briefs, can be found on the Minnesota State Law Library website (<https://mncourts.libguides.com/appeals>).

Macluumaad dheeri ah oo faaiido muhiim ah, ayna kujiraan tusaalayaasha dacwadaha kooban, waxaa laga helayaa webseetka Maktabada Sharciga ee Gobalka Minnesota oo ah (<https://mncourts.libguides.com/appeals>).

The State Law Library also hosts an Unemployment Appeal Legal Advice Clinic (<https://mn.gov/law-library/services/clinics/unemploymentclinic.jsp>), where you can get free legal advice about your case from a volunteer attorney or get help filling out forms. To sign up for the Unemployment Appeal Legal Advice Clinic, call (651) 297-7651.

Maktabada Sharciga Gobalka ayaa sidoo kale leh Xarunta Caafimaadka ee Talo Bixinta Sharciga Racfaanka (<https://mn.gov/law-library/services/clinics/unemploymentclinic.jsp>), Halkaasoo aad kahelayso talo sharci oo bilaash ah oo uu kusiinaayo qareen mutadawac ah ama lagaa caawinaayo buuxinta foomamka. Si aad iskaqorto xarunta Caafimaadka ee Talo bixinta Sharciga Racfaanka, wac (651) 297-7651.

## **Important Information about Unemployment Appeals Macluumaadka Muhiimka ah ee Kusaabsan Racfaanada Gunada shaqo La'aanta**

### **Request Reconsideration Before You File Your Appeal Codso Dib u eegis lagu sameenaayo xukunka Kahor intaadan Gudbin Racfaan**

Before you appeal to the Court of Appeals, you must request reconsideration of the ULJ's initial decision before the deadline for that request, and receive the ULJ's *ruling on your request for reconsideration*. The ULJ's initial decision included instructions for requesting reconsideration. The ULJ's *ruling on a request for reconsideration* is the final decision that you can appeal to the Court of Appeals.

Kahor inta aadan racfaan ugudbin Maxkamada Racfaanada, waxaa qasab ah inaad codsato dib u eegis lagu sameeyo go'aanka kama hore ee ULJ kahor intaan lagaarin mudada loocayimay codsiga racfaanka, kadibna hel xukunka ULJ *ay kaqaadato codsigaaga dib u eegista go'aanka*. Go'aanka koobaad ee ULJ waxaa kujiray tilmaamo laxariira qaabka aad dib u eegis udalban karto. Xukunka ULJ *ay kagaarto codsigaaga dib u eegista go'aanka* waa go'aan kama danbays ah kaasoo aad racfaan uga qaadan karto Maxkamada Racfaanada.

### **Court of Appeals Opinions are Available to the Public Dookhyada Maxkamada Racfaanada waxaa heli Kara Bulsho waynta**

Once your appeal is decided, the Court of Appeals will issue a written decision, called an "opinion," which will describe your case and the reasons for the court's decision. **The opinion will be available to the public on the Minnesota Judicial Branch's website.** After an opinion is filed, it cannot be removed from the Internet. This means that anyone who searches for your name on the Internet may be able to find and read the opinion, which will include information about the reason you were fired.

Marka go'aan laga gaaro racfaankaaga, Maxkamada Racfaanadu waxay soo saaraysaa go'aan qoran, oo loogu yeero "Fikirka," taasoo sharaxaysa kiiskaaga iyo sababaha loo cuskaday go'aanka maxkamada. **Fikirku wuxuu ufunnaan doonaa dadwaynaha ayagoo ka arkaaya webseetka Waaxda Garsoorka ee Minnesota.** Kadib marka labuuxiyo bayaanka fikirka, lagama saari karo interneetka. Tani waxay kadhigan tahay in qofkasta oo magacaaga kabaara interneetka uu awoodi doono inuu helo uuna akhriyo fikirka, kaasoo ay kujiri doonaan macluumaad kusaabsan sababta shaqada lagaaga cayriyay.

## **Laws that Apply to your Appeal** **Sharciyada Qabanaaya Racfaankaaga**

Your appeal is governed by the [Minnesota Rules of Civil Appellate Procedure](#), the [Special Rules of Practice for the Minnesota Court of Appeals](#), and the Minnesota Statutes. [Minnesota Statute section 268.105](#) applies specifically to unemployment benefits appeals.

Racfaankaaga waxaa maamulaaya [Sharciyada Minnesota ee Hanaanka Racfaanka Madaniga ah](#), Xeerarka [Gaarka ah ee Shaqada Maxkamada Racfaanada ee Minnesota](#), iyo Qaanunada Minnesota. [Qaanuunka Minnesota Qaybta 268.105](#) ayaa si gaar ah uqusaysa racfaanada laxariira gunooyinka shaqo la'aanta.

This packet includes simplified instructions, but you should read the rules and statutes yourself for more information. **If you are representing yourself, you are responsible for researching court rules, case law, and statutes that govern your case.**

Buuggaan waxaa kujira tilmaamo fudud, waa inaad adigu akhrisataa xeerarka iyo qawaaniinta si aad macluumaad dheeri ah u ogaato. **Haddii aad matalayso naftaada, adigga ayaa masuul ka ah baarista xeerarka maxkamada, sharciga kiiska, iyo qawaaniinta qabanaaya kiiskaaga.**

You can find the rules, case law, and statutes at the Minnesota State Law Library (Room G25, Minnesota Judicial Center, 25 Rev. Dr. Martin Luther King Jr. Blvd., St. Paul, MN 55155, or call 651-297-7651), and at public libraries. You can also find the rules at the Minnesota Judicial Branch's website: <http://www.mncourts.gov/About-The-Courts/SupremeCourt/CourtRules.aspx>.

Waxaad kahelaysaa xeerarka, sharciga kiiska, iyo qawaaniinta Maktabada Sharciga Gobalka Minnesota (Room G25, Minnesota Judicial Center, 25 Rev. Dr. Martin Luther King Jr. Blvd., St. Paul, MN 55155, ama wac 651-297-7651), iyo maktabadaha dadwaynaha. Waxaa sidoo kale kahelaysaa xeerarka Webseetka Waaxda Garsoorka ee Minnesota: <http://www.mncourts.gov/About-The-Courts/SupremeCourt/CourtRules.aspx>.

## **Filing Fees/Qarashaadka Buuxinta Racfaanka**

An applicant appealing the denial of unemployment benefits does **not** have to pay a filing fee. [Minn. Stat. § 268.105, subds. 6\(b\), 7\(c\)](#).

Qofka racfaanka kaqaadanaaya diidmada gunooyinka shaqo la'aanta ee loodiiday lagama doonaayo inuu dhiibo qarashka gudbinta racfaanka. [Minn. Stat. § 268.105, subds. 6\(b\), 7\(c\)](#).

## **Important Information about your Appeal Macluumaadka Muhiimka ah ee Kusaabsan Racfaanka**

### **Your Forms Must be Filled Out in English Foomamkaaga waa in lagu Buuxshaa Af-Ingiriis**

The forms in the attached packet are worded in both English and the translated language. But your answers on the form must be provided in English. If you are unable to fill out your forms in English yourself, you will need to arrange for someone to assist you to word your answers in English.

Foomamka kujira baakada lifaaqa kujirta waxay kuqoran yihiin labadaba luuqada Ingiriiska iyo luuqada Soomaaliga. Laakiin jawaabahaaga foomka waa in lagu qoraa Af-Ingiriis. Haddii aadan awoodin inaad buuxiso foomamkaaga adoo kujawaabaaya luuqada Ingiriiska oo aad adigu qortay, waa inaad diyaarsataa qof kaacaawiya qorista jawaabahaaga oo Af-Ingiriis ah.

### **Your Brief Must be Written in English Sharaxaada Kooban ee Dacwadaada waa in lagu qoraa Af-Ingiriis**

A major part of your appeal is your *brief*, which is where you will make your legal arguments supporting the outcome you are seeking in your appeal. Your brief will likely require some legal research into the statutes and case law that apply to your appeal. The brief must be written in English. If you are unable to write your brief in English yourself, you will need to arrange for someone to assist you researching and writing your brief in English.

Qayb wayn oo kamid ah racfaankaaga ayaa ah *sharaxaada kooban ee dacwadaada*, taasoo ah meesha aad dooda sharci kuqorayso taasoo taageeraysa natiijada aad doonayso inay kasoo baxdo racfaankaaga. Sharaxaadaada kooban waxay ubadan tahay inay ubaahato baaritaan sharci oo aad kusamayso qawaaniinta iyo kiiska sharciga quseeya racfaankaaga. Sharaxaada kooban ee dacwadaada waa in lagu qoraa Af-Ingiriis. Haddii aadan awoodin inaad buuxiso sharaxaada kooban adoo kujawaabaaya luuqada Ingiriiska oo aad adigu qortay, waa inaad diyaarsataa qof kaacaawiya baarista iyo qorista sharaxaadaada kooban oo Af-Ingiriis ah.

## **Step-by-Step Instructions for Filing an Unemployment Appeal Tilmaamaha Talaabo-talaabada ah ee qaabka aad Ubuuxinayso Racfaan laxariira Shaqo la'aanta**

### **Step 1: Calculate Your Appeal Deadline Talaabada 1: Xisaabi Waqtiga Kama danbaysta ah ee Racfaankaaga**

If you received your ***ruling on the request for reconsideration by email*** from the Department of Employment and Economic Development (DEED), you have **45 days to file** your appeal, from the date the email was sent.

Haddii aad heshay xukunka laga gaaray ***codsigaaga dib u eegista xukunka ayna iimeel kuugusoo dirto*** Waaxda Shaqada iyo Hormarinta Dhaqaalaha (DEED), waxaad haysataa **45 maalmood inaad kugudbiso** racfaankaaga, laga bilaabo taariikhda laguusoo diray iimeelka.

If you received your ***ruling on the request for reconsideration in the mail*** from DEED, you have **48 days to file** from the date it was mailed to you.

Haddii laguugusoo diro ***xukunka laga gaaray codsigaaga dib u eegista go'aanka ayna boostada kuugusoo dirto*** DEED, waxaad haysataa **48 maalmood inaad kugudbiso** laga bilaabo taariikhda boostada laguusoo diray.

**General Instructions for Calculating Court of Appeals Deadlines**  
**Tilmaamaha guud ee xisaabinta Waqtiyada ay ku egyihiin Racfaanada Maxkamadu**

- Do not count the day of the event that starts the time period (for example, the date the ULJ’s decision was mailed to you). Instead, start counting the next day.  
Ha xisaabin maalinta dacwadu dhacayso taasoo kabilaabanta waqtiga (tusaale ahaan, taariikhda go’aanka ULJ boostada laguugusoo diray). Taas badalkeed, kabiloow tirinta maalinta xigta.
- Continue counting calendar days. Do not skip weekends or legal holidays.  
Siiwad tirinta maalmaha kalaandarka. Haka boodin maalmaha dhamaadka asbuuca ama fasaxyada sharciga ah.
- If the last day of the period falls on a Saturday, Sunday, or legal holiday, then the deadline is the next business day. For the purpose of calculating deadlines, legal holidays for the appellate courts are:  
Haddii maalinta ugu danbaysa ee muddadu noqoto maalin Sabti ah, Axad ah, ama maalin sharciyan fasax ah, markaas maalinta kama danbaysta ah waxay noqonaysaa maalinta xigta ee shaqada. Sababo laxariira tirinta maalmaha kama danbaysta ah ee dacwada, maalmaha fasaxa u ah maxkamadaha racfaanka ayaa ah:
  - New Year’s Day (January 1);  
Maalinta Sanadka Cusub (Janaayo 1);
  - Martin Luther King, Jr.’s birthday (the third Monday in January);  
Maalinta Dhalashada Martin Luther King, Jr. (Isniinta sadexaad ee bisha Janaayo);
  - Presidents’ Day (the third Monday in February);  
Maalinta Madaxwaynaha (Isniinta saddexaad ee Feebaraayo);
  - Memorial Day (the last Monday in May);  
Maalinta Xuska (Isniinta ugu danbaysa bisha Maajo);
  - Juneteenth (June 19)/Feystada Juneteenth (19kii Juun)
  - Independence Day (July 4);  
Maalinta Xornimada (Luuliyo 4);
  - Labor Day (the first Monday in September);  
Maalinta Shaqaalaha (Isniinta ugu horaysa bisha Sibteembar);
  - Columbus Day (the second Monday in October), even though the appellate courts are open on Columbus Day;  
Maalinta Columbus (Isniinta labaad ee Oktoobar), inkastoo Maxkamadaha Racfaanku furan yihiin Maalinta Columbus;
  - Veterans’ Day (November 11);  
Maalinta Halyeeyga (Nofeembar 11);
  - Thanksgiving Day (the fourth Thursday in November);  
Maalinta Mahad Naqa (Khamiista Afaraad ee Nofeembar);
  - The Friday after Thanksgiving; and  
Jamcada Kadanbaysa Maalinta Mahad Naqa; iyo
  - Christmas Day (December 25).  
Maalinta Kiristaanka (Diseembar 25).

- The deadline for starting my appeal is \_\_\_\_\_.  
Taariikhda Kama danbaysta ah ee bilaabida Racfaankayga ayaa ah

**Note: The Court of Appeals cannot extend the deadline for appeal.** Before the deadline you calculate in this step, the *Petition for Writ of Certiorari* must be **filed** with the Clerk of the Appellate Courts and **served** on all respondents (steps 2-5 provide instructions for filing and serving documents). **If you do not file and serve the *Petition for Writ of Certiorari* by the deadline, your appeal will be dismissed.**

**Ogsoonow: Maxkamada Racfaanadu makordhin karto waqtiga kama danbaysta ah ee racfaanka.** Kahor intaan lagaarin taariikhda kama danbaysta ah ee aad kuxisaabisay talaabadaan, *Racfaanka Kadhanka ah Go'aanka Kama danbaysta ah* waa in **lagudbiyaa** loona dhiibaa Karaaniga Maxkamadaha Racfaanka lana siiyaa **dhamaan** dhinacyada dacwada iskadifaacaaya (talaabooyinka 2-5 ayaa kusiinaaya tilmaamaha buuxinta iyo qaybinta dukumiintiyada). **Haddii aadan gudbin aadana qaybin Racfaanka Go'aanka Kama Danbaysta ah mudada loo asteevay, racfaankaaga waa latuurayaa.**

**Step 2: Fill out the *Petition for Writ of Certiorari*,  
*Statement of the Case*, and *Writ of Certiorari***

**Talaabada 2: Buuxi fomamka *Racfaanka Go'aanka Kama Danbaysta ah*,  
*Bayaanka Kiiska*, iyo *Dib u eegista xukunka kama Danbaysta ah***

- Fill out the *Petition for Writ of Certiorari*, which tells the court that you want to appeal.  
Buuxi *Racfaanka Go'aanka Kama Danbaysta ah*, kaasoo usheegaaya maxkamada inaad racfaan qaadanayso.
- Fill out the *Statement of the Case*, which should *briefly summarize* the reasons you think the ULJ's decision was incorrect. You do not need to make detailed arguments in the *Statement of the Case*, because you will make detailed arguments later in your *Brief*. Do not attach any additional documents to your *Statement of the Case*.  
Buuxi *Bayaanka Kiiska*, kaasoo *ay tahay inuu si kooban usharxo* sababaha ad u aaminsan tahay in go'aanka ULJ uu ahaa mid qaldan. Uma baahnid inaad gudbiso dood faahfaahsan markaad qorayso *Bayaanka Kiiska*, waayo waxaad doodaada oo faahfaahsan kuqoraysaa hadhoow foomka dacwada *Kooban*. Haku soo lifaaqin wax dukumiintiyada dheeri ah *Bayaankaaga Kiiska*.



- Fill out the *Writ of Certiorari*, which notifies the respondents that you have filed your appeal and orders the respondents to provide certain records. The Clerk of the Appellate Courts will sign the *Writ of Certiorari* after you file it and will return it to you (see step 7 for more information about the signed *Writ of Certiorari*).

Buuxi ***Dib u eegista xukunka kama Danbaysta ah***, taasoo usheegaysa eedayanayaasha inaad racfaan kaqaadatayay xukunka amarna kusiinaaya eedayanayaasha inay keenaan dukumiintiyada qaarkood. Karaaniga Maxkamadaha Racfaanka ayaa saxiixaaya ***Dib u eegista xukunka kama Danbaysta ah*** kadib markaad gudbis kadibna kuusoo celinaya (kafiiri Talaabada 7 wixii macluumaad dheeri ah oo kusaabsan ***Dib u eegista xukunka kama Danbaysta ah oo lasaxiixay***).

The party who files the appeal is called the “relator.” The other parties are called the “respondents.” In an unemployment appeal, the respondents include:

Dhinaca gudbinaaya racfaanka waxaa loogu yeeraa “dacwoode.” Dhinacyada kale waxaa loogu yeeraa “edayanayaal.” Marka laqaadaayo racfaanka laxariira gunada shaqo la’aanta, eedayanayaasha waxaa kamid ah:

- (1) the Minnesota Department of Employment and Economic Development (DEED), and waaxda Shaqada iyo Hormarinta Dhaqaalaha ee Minnesota (DEED), iyo
- (2) the employer(s), if any. ***This includes all employers that are listed in the ruling on the request for reconsideration.*** shaqaalaha, haddii uu jiro. ***Waxaa qeyb ka ah dhammaan shaqo-bixiyeyaasha ku qoran go'aanka codsashada dib-u-eegista.***

Fill in all of the blanks on the forms. If you do not fill out all of the blanks, the Clerk of the Appellate Courts may have to return the forms to you, and it may cause you to miss your deadline to appeal.

Buuxi dhamaan meelaha banaan ee foomamka. Haddii aadan buuxin dhamaan meelaha banaan, Karaaniga Maxkamadaha Racfaanka ayaa kuguso celin kara foomaka, waxayna qasbaysaa inaad haleeli waydo waqtigii udagsanaa in racfaankaaga laqaado.

Some questions on the ***Statement of the Case*** may require you to do some basic legal research before you answer them. Detailed instructions for completing this form are available at <https://mncourts.gov/Clerk-of-Appellate-Courts.aspx#tab04Forms>.

Su'aalaha qaar oo kujira ***Bayaanka Kiiska*** waxay kaaga baahan karaan inaad samayso baaritaan kooban oo sharci ah kahor intaadan kajawaabin. Tilmamaha buuxinta foomkaan oo faahfaahsan waxaa laga heli karaa <https://mncourts.gov/Clerk-of-Appellate-Courts.aspx#tab04Forms>.

**Step 3: File the *Petition for Writ of Certiorari*,  
*Statement of the Case*, and *Writ of Certiorari***  
**Talaabada 3: Gudbi fomamka *Racfaanka Go'aanka Kama Danbaysta ah*,  
*Bayaanka Kiiska*, iyo *Dib u eegista xukunka kama Danbaysta ah***

“Filing” means submitting or delivering documents to the Office of the Clerk of the Appellate Courts. Filing the *Petition for Writ of Certiorari* starts your appeal at the Court of Appeals.

“Buuxintu” waxay kadhigan tahay gudbinta ama gaynta dukumiintiyada aad ugayso Xafiiska Karaaniga Maxkamadaha Racfaanka. Inaad gudbiso *Racfaanka Go'aanka Kama Danbaysta ah* ayaa noqonaaya bilowga racfaanka aad ugudbinayso Maxkamadaha Racfaanada.

- Choose your method of filing (see instructions below).  
Dooro qaabka aad ubuuxinayso (kafiiri tilmaamaha hoose).

**General Instructions for “Filing”/Tilmaamaha guud ee “buuxinta” racfaanka**

Parties **without an attorney** may file documents by any of the following three methods: Dhinacyada **aan haysan qareenka** waxay kusoo gudbin karaan dukumiintiga mid kamid ah qaababka sadexda ah ee soosocda:

- (1) By **hand-delivering** them to the Clerk of the Appellate Courts during business hours (8:00 a.m. to 4:30 p.m. weekdays),  
Inaad si toos ah **ugu gayso** Karaaniga Maxkamadaha Racfaanka inta lagu jiro saacadaha shaqada (8:00 a.m. ilaa 4:30 p.m. maalmaha dhamaadka asbuuca),
- (2) By **mailing** the documents to the Clerk of the Appellate Courts, addressed to:  
Inaad **boostada** ugu dirto dukumiintiyada Karaaniga Maxkamadaha Racfaanka, adoo kuqoraaya ciwaanka:

Clerk of the Appellate Courts  
305 Minnesota Judicial Center  
25 Rev. Dr. Martin Luther King Jr. Blvd.  
St. Paul, MN 55155

For filing by postal mail, a document will be considered filed “on time” if it is deposited in the U.S. Mail by the deadline with correct postage and the correct address, even though the Clerk of the Appellate Courts will not receive the document on the day you deposit it in the mail.

Si aad ugu dirto boostada, dukumiintiga ayaa loo aqoonsanayaa mid lagusoo gudbiyay “waqtiga saxda ah” haddii lagu diro boostada Maraykanka xiliga loogu talagalay laguna diro boostada iyo ciwaanka saxda ah, inkastoo Karaaniga Maxkamadaha Racfaanku uusan heli doonin dukumiintiga isla maalinta aad kudirto boostada.

(3) By **submitting them electronically** through the appellate courts' e-filing system, E-MACS. Parties who do not have an attorney are not required to use E-MACS, but they are allowed to do so. But, once you choose to file in E-MACS, you must continue using it for filing. You may not go back to filing by hand-delivery or mail. **(Note: All attorneys are required to use E-MACS and cannot file documents by mail or by hand-delivery to the Clerk of the Appellate Courts.)**

Inaad si elektaroonig ah kugudbiso adoo adeegsanaaya hanaanka gudbinta oonleenka ah ee maxkamadaha racfaanka, E-MACS. Dhinacyada aan haysan qareenka lagama doonaayo inay adeegsadaan hanaanka E-MACS, laakiin waxaa loo ogolyahay inay adeegsadaan. Laakiin, markaad go'aansato inaad kugudbiso dukumiintiyada E-MACS, waa inaad wixii intaas kadanbeeya ayada kusoo gudbisaa. Kuma laaban kartid noocyada aad dukumiintiyada tooska ukeenayso ama boostada kusoo dirayso. **(Ogsoonow: Dhamaan qareenada waxaa laga doonayaa inay adeegsadaan E-MACS kumana diri karaan dukumiintiyada boostada ama si toos ah uguma gayn karaan Karaaniga Maxkamadaha Racfaanka.)**

For information about electronic filing and to submit documents electronically, go to the Clerk of the Appellate Courts' webpage ([www.mncourts.gov/Clerk-of-Appellate-Courts.aspx#tab05AppellateFiling](http://www.mncourts.gov/Clerk-of-Appellate-Courts.aspx#tab05AppellateFiling)). Filing by facsimile (fax) is not allowed. Si aad macluumaad uga hesho buuxinta dacwad si oonleen ah iyo gudbinta dukumiintiyada si oonleen ah, booqo websetka Karaaniga Maxkamadaha Racfaanka oo ah ([www.mncourts.gov/Clerk-of-Appellate-Courts.aspx#tab05AppellateFiling](http://www.mncourts.gov/Clerk-of-Appellate-Courts.aspx#tab05AppellateFiling)). Inaad aalada facsimile (fakiska) kusoo dirto lama ogola.

For additional instructions on filing, see [Minn. R. Civ. App. P. 125.01](#).

Wixii tilmaamo dheeri ah oo laxariira gudbinta, kafiiri [Minn. R. Civ. App. P. 125.01](#).

- If you are filing your documents by hand-delivery or by mail, make four copies of each of the following documents: (1) *Petition for Writ of Certiorari*, (2) *Statement of the Case*, (3) *Writ of Certiorari*, and (4) *Ruling on Request for Reconsideration* from the ULJ.

Haddii aad dukumintiga kugudbinayso si toos ah ama aad boosto kudirayso, afar koobi kabixi midkasta oo kamid ah dukumiintiyada soosocda: (1) *Racfaanka Go'aanka Kama Danbaysta ah*, (2) *Bayaanka Kiiska*, (3) *Dib u eegista xukunka kama Danbaysta ah*, iyo (4) *Xukunka kama Danbaysta ah ee Codsiga Dib u eegista* ee kasoo baxa ULJ.

- Keep one copy of each document for your records and file the original of each with the Clerk of the Appellate Courts.

Hayso hal koobi dukumiinti kasta oo kamid ah diiwaanadaada una gudbi nuqulka orijinaalka ah ee dukumiinti kasta Karaaniga Maxkamadaha Racfaanka.

**Step 4: Serve the documents on respondents**  
**Talaabada 4: Udir dukumiintiyada dhinacyada eedaysanayaasha ah**

Any time you submit a document to the Clerk of the Appellate Courts for filing, a copy must also be provided to all other parties at or before the time of filing. This is called “service.”

Markasta oo aad dirto dukumiinti aadna udirto karaaniga Maxkamadaha Racfaanka si aad racfan uga qaadato, waa in sidoo kale koobi loodiraa dhamaan dhinacyada xiliga ama kahor xiliga aad racfaanka gudbinayso. Tan waxaa looyaqaanaa “adeegga.”

You must also file proof that you have served the document (“proof of service”) with the Clerk of the Appellate Courts. Instructions for proof of service are at Step 5.

Waa inaad sidoo kale gudbisaa cadaynta ah inaad dukumiintiga (“cadaynta adeegga”) udiratay Karaaniga Maxkamadaha Racfaanka. Tilmaamaha cadaynta adeegga waxay kuqoran yihiin Talaabada 5.

**Important: You must file the *Petition for Writ of Certiorari* and serve it on the respondents by the deadline you calculated in Step 1, or your appeal will be dismissed.**

**Arin muhiim ah: Waxaa qasab ah inaad gudbiso *Racfaanka Go’aanka Kama Danbaysta ah aadna udirtaa eedaysanayaasha marka lagaaro xiliga aad kuxisaabisay Talaabada 1*, ama racfaankaaga waa ladiidayaa.**

- Choose your method of service (see instructions below). For each party who you need to serve documents on, follow these steps to decide how to serve that party:  
 Dooro nooca adeegga (kafiiri tilmaamaha hoose). Dhinac kasta oo ubaahan in dukumiintiyada lasiiyo, raac talabooyinkaan si aad ugo’aamiso sida aad adeeg usiin karto dhinacaas:

**General Instructions for “Service”/Habraqayada guud ee “Gudbinta Waraaqaha”**

If a party has an attorney, you must serve the attorney rather than the party. If a party does not have an attorney, serve that party directly.

Haddii qofka kale haysto qareen, dacwada u dir qareenka qofka ee ha u dirin qofka. Haddii uusan qofka kale haysan qareen, waraaqaha toos ugu dir qofkaas.

Did you file your *Notice of Appeal* and *Statement of the Case* electronically using EMACS **AND** is the person you are serving registered for electronic service in E-MACS?

Ma waxaad ku soo dirsatay *Ogeysiiska Racfaanka* iyo *Qoraalka Dacwada* habka internetka ee EMACS **OO** qofkaad u direyso ma ka diiwaan gashan yahay habka E-MACS?

If you answered **YES** to both questions above, then you may serve that person electronically using E-MACS.

Haddii aad **HAA** uga jawaabtay labada su’aalood ee kore, markaas qofka kale waa in aad ugu gudbiso habka internetka ee E-MACS.

If you answered **NO** to either question above, then you filed your documents by hand delivery or by U.S. Mail and therefore you must choose one of the options below for service: Haddii aad **MAYA** uga jawaabtay labada su'aalood ee kore midkood, markaas waxaad waraaqaha ku soo gudbisay gacanta ama boostada oo waa in aad doorataa mid ka mid ah habka gudbinta waraaqaha ah ee hoose:

**(1) By mail:** Deposit the documents, correctly addressed, in the U.S. Mail, with adequate first-class postage. You may serve documents by mail yourself.

**For simplicity, this packet assumes that you are serving documents either electronically or by mail, and only includes forms relating to service by mail.**

**Boostada:** Dukumiintiga ugu dir si sax ahna ciwaanka ugu qor, Boostada Maraykanka, adoo kudiraaya boostada heerka koobaad oo kuhaboon. Waxaad dukumiintiyada kudiri kartaa boostada. **Si loo fududeeyo, baakadaan waxay uqaadanaysaa inaad dukumintiga kudirayso si elegtaroonig ah ama boostada, waxaana kaliya kujira foomamka laxariira dukumiintiyada lagu diraaayo boostada.**

**(2) In person** (“personal service”): Have another person hand-deliver the document. The person who hand-delivers the document must be 18 years or older and not a party to the appeal. **You cannot serve a party in person yourself.**

**Si toos ah** (“adeegga tooska ah”): Inaad qofkale udhiibto si uu toos ugu geeyo dukumiintiga. Qofka keena dukumiintiga waa inuu noqdaa 18 sano jir ama kawayn uusana qayb ka ahayn racfaanka. **Adigu si toos ah uguma gayn kartid qolo kale si toos ah.**

**(3)** If the recipient consents to another method of delivery, such as email or fax, you could also use that method for service.

Haddii qofka helaaya dukumiintiga uu ogolaado inaad qaab kale ugu keento, sida inaad iimeel ama fakis ugu dirto, waxaad adeegsan kartaa qaabkaas aad adeegga kugudbinayso.

The Certificate of Service forms in this packet would need to be modified if you choose to serve documents in person or by another method (with consent of the recipient). For additional instructions on service, see [Minn. R. Civ. App. P. 125.02 and 125.03](#).

Foomamka Shahaadada Adeegga ee kujira baakadaan waxay ubaahan doonaan in labadalo haddii aad doorato inaad dukumiintiga ugayso si toos ah ama aad qaab kale kudirto (markuu ogolaado qofka dukumiintiga helaaya). Wixii laxariira tilmaamaha dheeriga ah ee adeegga, fiiri [Minn. R. Civ. App. P. 125.02 iyo 125.03](#).

- Serve your employer(s) with a copy of (1) *Petition for Writ of Certiorari*, (2) *Statement of the Case*, (3) unsigned copy of the *Writ of Certiorari*, and (4) *Ruling on Request for Reconsideration*. Make sure that you serve all employers listed in the *ruling on the request for reconsideration* with a copy of the appeal documents.

Ugee cida aad ushaqayso koobiga (1) *Racfaanka Go'aanka Kama Danbaysta ah*, (2) *Bayaanka Kiiska*, (3) koobiga aan lasaxiixin ee *Dib u eegista xukunka kama Danbaysta ah*, iyo (4) *Xukunka kama Danbaysta ah ee Codsigaaga Dib u eegista xukunka*. In aad dhammaan shaqa-bixiyeyaasha go'aanka ku xusan ugu adeegto codsiga dib-u-fiirsashada iyadoo la isticmaalayo nuqulka dukumentiyada racfaanka.

- Serve DEED with a copy of (1) *Petition for Writ of Certiorari*, (2) *Statement of the Case*, (3) unsigned copy of the *Writ of Certiorari*, and (4) *Ruling on Request for Reconsideration*. To serve DEED, the documents can be either electronically served on DEED's attorney (currently Anne Froelich, Attorney Bar ID #000392094) or mailed to:

Ugee DEED koobiga (1) *Racfaanka Go'aanka Kama Danbaysta ah*, (2) *Bayaanka Kiiska*, (3) koobiga aan lasaxiixin ee *Dib u eegista xukunka kama Danbaysta ah*, iyo (4) *Xukunka kama Danbaysta ah ee Codsigaaga Dib u eegista xukunka*. Si aad DEED dukumiintiyada usiiso, dukumiintiyadu waxay noqon karaan kuwo si oonleen ah loogusoo diro qareenka DEED (hadda waxaa ah Anne Froelich, Attorney Bar ID #000392094) ama boostada loogu diro:

Dept. of Employment and Economic Development  
The Great Northern Building  
180 East 5<sup>th</sup> St, Suite 1200  
St. Paul, MN 55102

**Step 5: If you served any documents by mail or other non-electronic method:**

**Fill out and file the *Certificate of Service***

**Talaabada 5: Hadaad wax dukumiintiyada ah kudirtay boostada ama qaab kale oo aan oonleen ahayn: Buuxi oo gudbi *Shahaadada Adeegga***

**Every** document submitted to the Clerk of the Appellate Courts for filing must be accompanied by proof that the document was served on the other parties to the appeal. This is called “proof of service.” Documents served electronically do not require a separate document showing proof of service.

**Dukumiinti** kasta oo loodiyo Karaaniga Maxkamadaha Racfaanka si dacwad loo qabto waa in lasoo raaciyaa cadayn sheegaysa in dukumiintiga lasiiyo dhinacyada kale ee racfaanka kujira. Tan waxaa looyaqaanaa “cadaynta adeegga.” Dukumiintiyada qaabka oonleenka ah lagu gudbiyay uma baahna dukumiinti gaar ah oo muujinaysa cadaynta adeegga.

## **General Instructions for “Proof of Service” Tilmaamaha guud ee "Caddeynta Gudbinta"**

Did you serve **all** of your documents on **all** parties electronically using E-MACS?  
Ma waxaad waraaqaha oo **dhan** dadka kale oo **dhan** ugu dirtay habka E-MACS?

**If yes: No separate proof of service is required**, because the Clerk of the Appellate Courts will receive proof (from E-MACS itself) that you have served each document electronically. Skip to Step 6 on page 11.

**Haddii aad haa tiri: Looma baahna caddeyn ah dirista**, sababtoo ah Karraaniga Maxkamadaha Racfaanka ayey gaareysaa caddeynta (lagu gudbiyo E-MACS) ee lagu diro habkaas ah intarnetka. U gudub Tallaabada 6 ee bogga 11.

**If no: Any time you serve papers in person, by postal mail, or by another delivery method (with the consent of the recipient), you must file a separate form showing proof of service.**

**Haddii aad maya tiri: Mar kasta oo aad waraaqo ku gudbiso si shakhsi ah, boostada, ama qaab kale (oo uu oggol yahay qofka kale), waa inaad soo gudbiso foomka caddeynta gudbinta.**

Usually, proof of service is (1) a notarized *Affidavit of Service* or (2) a *Certificate of Service*. The difference between an *Affidavit of Service* and a *Certificate of Service* is that a *Certificate of Service* does not need to be signed in front of a notary.

Badanaa, caddeynta gudbinta waxaa la saaraa (1) notaayo *Markhaatikaca Gudbinta* ama (2) *Caddeynta Gudbinta*. Waxay ku kala duwan yihiin *Markhaatikaca Gudbinta* iyo *Caddeynta Gudbinta* waa in aan *Caddeynta Gudbinta* la iska rabin in lagu saxiixo qofka notaayada saaraya hortiisa.

You may file one *Certificate of Service* (or *Affidavit of Service*) listing multiple documents if you serve those documents on the same date and on the same parties.

Waxaad soo gudbin kartaa *Caddeynta Gudbinta* (ama *Markhaatikaca Gudbinta*) sida ku qoran waraaqo badan haddii aad dadka u gudbineso waraaqahaas taariikh isku mid ah.

For additional instructions on proof of service, see [Minn. R. Civ. App. P. 125.04](#).  
Faahfaahin dheeraad ah oo ah dirista waraaqaha, ka eego [Minn. R. Civ. App. P. 125.04](#).

If you served any documents by mail or other non-electronic method, follow the checklist on the next page to submit proof of service for those documents.

Haddii aad waraaqo ku soo dirtay boostada ama qaab kale oo aan intarnetka ahayn, waa in aad raacdo waxa ku qoran bogga dambe si aad u soo dirto caddeynta gudbinta waraaqaha.

- The person who served the documents by mail must complete and sign the form titled ***Relator’s Certificate of Service by Mail of the Petition, Unsigned Writ, Statement of the Case, and Unemployment Law Judge’s Decision***

Qofka keenay dukumiintiyada kunasoo diray boostada waa inuu buuxiyaa uuna saxiixaa foomka ciwaankiisu yahay ***Shahaadada Racfaan qaataha ee Dirista dukumiintiyada lagu diray Boostada ee Racfaanka, Xukun aan Lasaxiixin, Bayaanka Kiiska, iyo Go’aanka Xaakimka Sharciga Gunada Shaqo la’aanta***

The ***Certificate of Service*** must include, from top to bottom:

Shahaadada ***Adeegga lagu Diraayo Boostada*** waa in lagu diraa, sal iyo baar:

1. The parties’ names and case file number;  
Magacyada iyo nambarka kiiska qolada;
2. County where the form was signed;  
Degmada foomka lagu saxiixay;
3. The name of the person who served the documents;  
Magaca qofka bixiyay dukumiintiyada;
4. The titles of the documents that were served (on the forms included with this packet, the titles of the document are already filled in);  
Ciwaanada dukumiintiyada lagudbiyay (ee kuqoran foomamka kujirta baakadaan, ciwaanada dukumiintiyada horay loo gudbiyay);
5. The date the documents were served;  
Taariikhda dukumiintiga lagudbiyay;
6. The names of the parties who were served and the addresses to which the documents were mailed or delivered to those parties;  
Magacyada dhinacyada loodiray dukumiintiga iyo ciwaanada dukumiintiyada boostada loogu diray ama tooska loogu geeyay dhinacyadaas;
7. The signature of the person who served the documents, the date the form was signed, and the county and state where the form was signed.  
Saxiixa qofka dukumiintiyada diray, taariikhda foomka lasaxiixay, iyo wadanka iyo gobalka foomamka lagu saxiixay.

**Note: You will need different *Certificate of Service* forms at different steps in the process. Do not fill out or file all of the *Certificate of Service* forms at the same time.**

**Ogsoonow: Waxaad ubaahan doontaa foomka *Shahaadada Adeegga* oo kaladuwan intaad kujirto talaabooyinka kaladuwan ee hanaanka. Habuuxin foomamka *Shahaadada Adeegga* iskumar.**



- File the signed *Certificate of Service* with the Clerk of the Appellate Courts.

Gudbi *Shahaadada Adeegga* oo saxiixan una dir Karaaniga Maxkamadaha Racfaanka.

- If you used E-MACS to electronically file your *Petition for Writ of Certiorari*, *Writ of Certiorari*, and *Statement of the Case*, you will also file your *Certificate of Service* electronically using E-MACS (even if you served your documents by mail or in person). The *Certificate of Service* must be uploaded as a separate PDF or Word document – do not combine with one of your other documents into a single PDF or Word document.

Haddii aad adeegsatay E-MACS si aad oonleen ahaan ugu gudbiso Racfaankaga *Xukunka kama Danbaysta ah, Dib u eegista xukunka kama Danbaysta ah*, iyo *Bayaanka Kiiska*, waxaad sidoo kale gudbinaysaa *Shahaadada Adeegga* ood oonleen ahaan ugu dirayso adoo adeegsanaaya E-MACS (xataa hadaad dukumiintiyada kudirtay boostada ama aad toos ugaysay). Shahaadada *Adeegga* waa in lasoo galiyaa barta ayoo ah PDF ama Word gaar ugo'an – hakudarin mid kamid ah dukumiintiyada kale adoo kadhigaaya hal PDF ama Word.

- If you filed your *Petition for Writ of Certiorari*, *Writ of Certiorari*, and *Statement of the Case* by hand delivery or by mail, you may also file your *Certificate of Service* by hand delivery or by mail.

Haddii aad kugudbisay *Racfaankaaa Go'aanka Kama Danbaysta ah, Dib u eegista xukunka kama Danbaysta ah*, iyo *Bayaanka Kiiska* si toos ah ama aad boostada kudirtay, waxaad sidoo kale kugudbin kartaa *Shahaadada Aanka Kama Danbaysta ah* si toos ah ama boostada.

- See Step 3 for additional instructions on how to file documents.  
Kafiiri Talaabada 3 si aad uhesho tilmaamo dheeri ah oo kusaabsan sida aad ugudbinayso dukumiintiyada.

**Step 6: Serve the signed *Writ of Certiorari* and file proof of service**  
**Talaabada 6: Ugudbi *Dib u eegista xukunka kama Danbaysta ah* oo saxiixan**  
**una gudbi cadaynta adeegga**

The Office of the Clerk of the Appellate Courts will distribute the signed (“issued”) *Writ of Certiorari* soon after you file it. If you filed your appeal by mail or in person, the issued *Writ of Certiorari* will be mailed back to you. If you filed your appeal electronically through E-MACS, the issued *Writ of Certiorari* will be returned to you electronically.

Xafiiska Karaaniga Maxkamadaha Racfaanka ayaa qaybin doona foomka saxiixan (“lasoo saaray”) ee *Dib u eegista xukunka kama Danbaysta ah* si markaba kadib markaad ugudbiso. Haddii aad racfaankaaga kugudbiso boostada ama aad toos ugayso, foomka lasoo saaray ee *Dib u eegista xukunka kama Danbaysta ah* adiga ayaa dib boostada laguugu soodirayaa. Haddii aad racfaankaaga si oonleen ah ugu gudbisay E-MACS, foomka lasoosaaray ee *Dib u eegista xukunka kama Danbaysta ah* adiga ayaa si oonleen ahaan laguugu soo celinayaa.

No matter how you receive the “issued” *Writ of Certiorari*, you must serve a copy on all of the other parties to the appeal, because the Clerk of the Appellate Courts only sends a copy of the issued *Writ of Certiorari* to the party who initiated the appeal.

Ayadoon laga fiirin sida aad kuheshay foomka “lasoo saaray” ee *Dib u eegista xukunka kama Danbaysta ah*, waxaa qasab kugu ah inaad koobi siiso dhaman dhinacyada racfaanka kujira, waayo Karaaniga Maxkamadaha Racfaanka wuxuu kaliya koobiga foomka lasoosaaray ee *Dib u eegista xukunka kama Danbaysta ah* udirayaa qofkii racfaanka qaatay.

- Receive the issued *Writ of Certiorari* from the Clerk of the Appellate Courts.  
Kaqaado foomka lasoo saaray ee *Dib u eegista xukunka kama Danbaysta ah* Karaaniga Maxkamadaha Racfaanka.
- Make three copies of the issued *Writ of Certiorari*. Keep one copy for your records.  
Sadex koobi kabixi foomka lasoo saaray ee *Dib u eegista xukunka kama Danbaysta ah*.  
Kuhayso mid kamid ah nuqulada diiwaankaaga.
- Serve one copy on your former employer(s) (see Step 5 above for instructions on how to serve documents).  
Hal koobi sii shirkadii aad horay ugu shaqayn jirtay (Kafiiri Talaabada 4 ee kore tilmaamaha sida aad kubixinayso dukumiintiyada).
- Serve one copy on DEED (see Step 4 above for instructions on how to serve documents).  
Hal koobi sii DEED (Kafiiri Talaabada 5 ee kore tilmaamaha sida aad kubixinayso dukumiintiyada).

- The person who served the issued *Writ of Certiorari* must fill out and sign the form titled *Relator's Certificate of Service by Mail of Issued Writ of Certiorari*. This is proof of service for the issued *Writ of Certiorari*. See Step 5 above for instructions about filling out the *Certificate of Service*.

Qofka baxiyay foomka lasoo saaray ee *Dib u eegista xukunka kama Danbaysta ah* waa inuu buuxshaa uuna saxiixaa foomka ciwaankiisu yahay *Shahaadada Adeegga Racfaan qaataha ee Foomka Lasoosaaray ee Dib u eegista xukunka kama Danbaysta ah oo boostada lagu diray*. Tani waa cadaynta adeegga foomka lasoo saaray ee *Dib u eegista xukunka kama Danbaysta ah*. Kafiiri Talaabada 5 ee kore tilmaamaha laxariira buuxinta *Shahaadada Adeegga*.

